



Hadii aad maqashaan mu'adinka dhaha wuxuu dhahayo, anigana igu saliya

Cabdullaahi Binu Camar Binu Caas Allaha ka raali ahaade wuxuu ka maqlay Nabiga scw isagoo dhahaya: "Hadii aad maqashaan mu'adinka dhaha wuxuu dhahayo, anigana igu saliya, waayo qofka igu saliya hal mar Ilaahay ayaa toban jeer ku saliya, ka dibna ii waydiiya Ilaahay wasiila, wasiiladu waa darajo janada ku taal, oo aan ku haboonayn adoon ka mida adoomada Ilaahay mooyaane, waxaan rajaynayaa inaan noqdo adoonkaas, qofka ii waydiiya wasiila waxaa gaaraya shafaacadayda".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu ummaddiisa ku booriyey qofka maqla mu'adinka salaada u adimaya inuu ka daba dhoho wuxuu leeyahay mu'adinku, marka laga reebo xay calataynka, labadaa wuxuu ka daba dhahayaa: laa xawla walaa quwata ilaa billaah, ka dib Nabiga scw ayuu ku saliyayaa marka aadaanku dhamaado, qofka hal mar ku saliya sababteeda Ilaahay wuxuu ugu saliyaa toban salaadood, salaada Ilaahay ku saliyaayo adoonkiisa macnaheedu waa in Ilaahay adoonka ku amaanayo malaa`igta agteeda. Ka dib wuxuu faray Rasuulku scw in Ilaahay loo waydiiyo "wasiila", waana darajo janada ka mida, waana tan ugu saraysa, waana darajo aan ku haboonayn una qalmin hal adoon oo adoomada Ilaahay ka mida mooyee, waxaan Ilaahay ka rajaynayaa inaan noqdo adoonkaa, Nabigu scw wuxuu sidaa u yiri waa tawaaduc, waayo hadii darajadaas sare hal qof mudan yahay, qofkaasi isaga maahee cid kale ma noqonaayo, waayo isagaa ugu fadli badan khalqiga. Nabigu scw wuxuu cadeeyey in qofka Ilaahay Nabiga uga barya "wasiilo" inuu halayo shafaacada Nabiga scw.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65087>

